# Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo (Frequently Asked Questions, FAQs) Deeqaha Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhibaatada Maskax ahaaneed

Iyadoo loo adeegsanayo Xeerka Kaalmada Waxbarashada Caruurnimada Hore (Fair Start for Kids Act, FSKA) (Senate Bill 5237), Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska (Department of Children, Youth, and Families, DCYF) waxay bixisaa Deeqo Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhibaato Maskax ahaaneed (Trauma-Informed Care, TIC) ee loogu talagalay daryeel bixiyeyaasha u-qalma inay dhamaystiraan waxbarashada iyo tababarka Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhibaato Maskax ahaaneed ee DCYF aqoonsan tahay.

### Su'aal. Waa maxay waxbarashada u qalanta Deeqda Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhibaato Maskax ahaaneed?

Jawaab. Waxbarashada soo socota ayaa u qalanta:

- Shahaadada koobaad ee jaamacadda ama ka sare ee caafimaadka dhimirka dhalaanka iyo caruurnimada hore ($1,200) (la taliyayaasha caafimaadka dhimirka ee dhalaanka iyo caruurnimada hore uma qalmaan deeqdan.)
- Iskaashatada Qoyska iyo Dhalaanka (Infant Family Associate, IFA) ee Caafimaadka Dhimirka Dhalaanka ee Ururka Washington (Washington Association of Infant Mental Health) ($800)
- Takhasuslayaasha Qoyska iyo Dhalaanka (Infant Family Specialist, IFS) ee Washington Association of Infant Mental Health ($1,200)
- Kormeeritaanka Qoyska iyo Dhalaanka (Infant Family Reflective Supervisor, IFRS) ee Washington Association of Infant Mental Health ($1,200)
- Takhasuslayaasha Caafimaadka Dhimirka Dhalaanka (Infant Mental Health Specialist, IMHS) ee Washington Association of Infant Mental Health) ($1,200)

### Su'aal. Waa maxay tababarka ay u qalma Deeqda Maaliyadeed ee Daryeelka Dhibataada ee Xog-ogaalinimo?

Jawaab. Tababarka soo socda ayaa u qalma:

**Qeybaha Tababarka Soo Baxaya ($800)**

- Filim Ka Samaynta Isdhexgalada Si Loogu Kobciyo Koritaanka (Filming Interactions to Nurture Development, FIND):
- Ka Caawinta Ilmaha Kobcinta Xirfadaha Shucuurta Bulshada ee ay Ansixisay DCYF (oo lagu heli karo Isbaanish iyo Soomaali)
- Mindful Me
- Koorsada Khadka Onlaynka ah ee Baritaanka Aasaaska Dhaqdhaqaaqa (Mobility Mentoring Foundation Course Online) (kaliya waxaa u qalma Barnaamijka Waxbarashada Iyo Kaalmada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP) iyo daryeel bixiyeyaasha Early ECEAP)
- U DIYAARGARAWGA tababarka daryeelka (waa inay dhamaystiraan ugu yaraan laba saac oo

kamid ah casharka 6 saacadood ah)
- Hirgelinta Loo Dhanyahay ee Habka Ahraamka ee Washington (Washington Pyramid Model, WAPM) + Hababka Ahraamta Ah Ee Loo Siman Yahay CUSBOONAYSIINTA (Qeybaha 1 iyo 2)

**Qeybaha Tababarka ee Hormarsan ($1,200)**

- Qeybaha Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhibaato Maskax ahaaneed ee DCYF ay ansixisay - Taxane Hormarsan (waa in la dhamaystiraa dhammaan afarta cashar)
- U DIYAARGARAWGA tababarka Daryeelka (waa inay dhamaystiraan ugu yaraan casharka 6 saacadood ah)
- Caafimaadka Dhimirka Xiliga Uurka iyo Dhalaanka ee ay ansixisay DCYF (waxaa lagu heli karaa Soomaali iyo Isbaanish)
- Qaabka Ahraamta Ka Hortaga ah ee Baritaanka Kobcinta Ilmaha (waa inuu buuxiyo shuruudaha Habka Ahraamta 1 iyo 2)

### Su'aal. Halkee ayaan ka heli karaa tababar u qalma deeqda?

Jawaab. Isticmaal aalada Raadi Tababarka (Find Training) ee Aalada Maareynta Waxbarashada iyo Diiwaanka Macluumaadka (Managed Education and Registry Information Tool, MERIT) si aad u raadiso tababarka u qalma (ka eeg liistada tababarada kore ee u qalma).

### Su'aal. Goorma ayaan heli doonaa lacagta deeqdayda?

Jawaab. Daryeel bixiyeyaasha, haddii dhamaan shuruudaha u qalmitaanka la buuxiyo, hawlgalinta lacag bixintu waxay qaadan kartaa ilaa hal bil. Tababarayaasha, haddii dhamaan shuruudaha u qalmitaanka la buuxiyo, hawlgalinta lacag bixintu waxay qaadan kartaa ilaa sadex bil.

### Su'aal. Miyaa la iiga baahan yahay inaan canshuur ka bixiyo deeqdayda?

Jawaab. Sababo la xiriira canshuuraha kala duwan, DCYF ma awoodo inay bixiso talo midaas ku saabsan. Waxaan kugu dhiirigelineynaa inaad la xiriirto xisaabiye xirfad leh haddii loo baahdo caawimaad dheeraad ah.

### Su'aal. Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo in la iga caawiyo cusboonaysiinta macluumaadkayga ee MERIT?

Jawaab. Haddii aad u baahan tahay caawimaad:

- Booqo websaytka Diiwaanka Shaqaalaha ee MERIT ee tilmaamaha talaabo talaabo ah inta badan hawlaha MERIT.
- Haddii xaaladaada shaqo ee MERIT loo diiwaan geliyo inay tahay mid iyada "isgalisay", fadlan la xiriir qofka aad u shaqayso.
- Wixii caawimaad dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir barta MERIT@dcyf.wa.gov.

### Su'aal. Maxaa dhacaya haddii aan qayb kamid ah tababarka sameeyo laakiin aanan dhamaynin? Miyaan dib ma u laaban karaa oo aan dhamayn karaa, mise waa inaan bilaabo tababar kale?

Jawaab. Si aad ugu qalanto deeqda, waa inaad si buuxda u dhamaystirtay tababarka lagu duubay ee ku jira diiwaankaaga MERIT. Waad go'aansan kartaa inaad dib u bilowdo tababarkii aad hore u bilowday ama aad bilawdo tababar cusub.

### Su'aal. Ma dhamaystiri karaa tababaro badan oo ma heli karaa deeqda labadaba?

Jawaab. Haa, waxaa laga yaabaa in aad hesho Deeq Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhibaato Maskaxda ah ee tababbar kasta oo la dhamaystiro ilaa inta ugu badan ee nolosha oo dhan

$1,200. Fadlan ogow in deeqda Maaliyadeed ugu badan ee nolosha loogu talagalay ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhibaato Maskaxda ah ay ku jiraan tababar iyo waxbarasho labadaba.

**Su'aal. Sidee ayay DCYF u go'aamisay tababarada lagu aqoonsanayo deeqaha maaliyadeed?**
Jawaab. DCYF, kooxda habaynta daryeel bixiyaha, iyo Kooxda La-talinta Daryeel Xog-ogaalnimo ee Dhibaatadsa Maskaxda ee FSKA (oo ka kooban khubaro aqoon u leh) ayaa aqoonsaday fursadaha tababarka ee lagu aqoonsanayo deeqaha lacageed. Fursadahaas
tababarka waxaa lagu doortay awooda ay u leeyihiin fikrado iyo mabaadi'da xog-ogaalnimo ee dhibaatada maskaxda ee muhiimka ah.

**Su'aal. Didee ayaan ku ogaan in tababar uu u qalmo Deeqda Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalinimo ee Dhibataada maskaxda?**
Jawaab. Dhammaan tababarka u qalma Deeqda Maaliyadeed ee Daryeel ogaalnimo ee dhibaatada maskaxda waa inay bixiyaan ururka tababbarka qandaraaska kula jira DCYF iyo tababaraha gobolka DCYF uu ansixiyay. Isticmaal aalada Raadi Tababarka (Find Training) ee Aalada Maareynta Waxbarashada iyo Diiwaanka Macluumaadka (Managed Education and Registry Information Tool, MERIT) si aad u hesho tababarka uu gobalku ansixiyay. Cinwaanka tababarka ee MERIT waa inay ku jiraan qoraal haddii ay u qalmaan abaal-marin.

**Su'aal. Ma heli karaa abaalmarino tababarkii hore?**
Jawaab. Shakhsiyaadka waa inay codsadaan Deeqda Maaliyadeed ee Daryeel Xog-ogaalnimo ee Dhibaato Maskaxda muddo hal sano gudaheed ah marka ay dhamaystaan tababarka ay u qalmaan. Deeqaha tababarka ee la dhamaystiray kahor Janaayo 1, 2023 waa in la sheegaa Juun 30, 2024. Lacagta bixinada hore waxa gacanta ka bixinayay DCYF iyo Child Care Aware ee Washington.

**Su'aal. Waxaan u shaqeeyaa barnaamijka daryeelka ilmaha kaas oo u furan caruurta hela kaalmada (horaan ayay uga diwaangashanaayeen) laakiin aan hadda uma adeego ilmo helo kaalmo. Miyaan u qalmaa inaan helo deeq?**
Jawaab. Waxa laga yaabaa inaad u qalanto deeq haddii barnaamijkaagu uu codsado lacag-bixinta kabitaanka ah ee 12 bilood ee la soo dhaafay kahor intaadan codsan deeqda. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo codsado lacagta kaalmada ah, fadlan ka eeg:
https://www.dcyf.wa.gov/services/ssps.

**Su'aal. Waa qadar intee le'eg ayaa la heli karaa Abaalmarinada Maaliyadeed ee Daryeelka Xo-ogaalinimo ee Dhibaato Maskaxda ah**
Jawaab. Gobolku waxa uu bixiyay $3.2 milyan ee Deeqda Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhibaatada Maskaxda labadan sano (2024-2025). Waxaa jira $1.8 milyan sanad maaliyadeedkan 2025 (Luuliyo 1 - Juun 30).

**Su'aal. Maxaan sameeyaa haddii aan dhamaysto tababbarka daryeelka xog-ogaalnimo ee dhibataada maskaxda balse aanan helin Deeqda Maaliyadeed ee Daryeelka xog-ogaalnimo ee Dhibataada Maskaxda?** Jawaab. La xiriir MERIT@dcyf.wa.gov si aad u waydiiso waxyaabaha ku saabsan Deeqda Maaliyadeed ee Daryeelka xog-ogaalnimo ee Dhibataada Maskaxda. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo websaytka Daryeel Xog-ogaalnimo ee Dhibaato ee DCYF